



# Waa maxay Deeqda Waxbarashada College Bound?

**Ardayda dugsiga dhexe:** Ma xiiseynaysaa daryeelka caafimaadka? Dhismaha? Naqshada ciyaarta muuqaalka ah? Maaraynta Ganacsiga? Nooc kasta oo higsiyadaada xirfadu yihiin ba, Deeqda Waxbarashada Kuleejka ayaa kaa caawinaysa inaad ka qaybgasho oo bixiso qarashka dugsiga oo kugu haboon! Deeqda College Bound waa qoonde hore oo laga bixinaayo deeqda dhaqaalaha gobalka oo la siinaayo ardayda u qalma ee buuxsha balan-qaadka Deeqda Kuleejka. Deeqda Waxbarashada Kuleejka ayaa daboolaysa heerka caadiga ah ee qarashka kuleejka, iyo deeq lagu bixinaayo qarashka buugaagta ee in ka badan 65 kuleej, jaamacado, iyo dugsiyada farsamada oo ku yaala Washington. Ma tahay qof Xiisaynaaya Kuleejka?

## Miyaan u qalma deeqda?

Ardayda buuxsha mid kamid ah shuruudaha soo socda ayaa si otomaatig ah looga diiwaan gelin doonaa barnaamijka Deeqda Waxbarashada Kuleejka:

- Waxaad dhigataa dugsiga dawladeed waxaadna u qalantaa cuntada bilaashka ah iyo cuntada qiimaha jaban (free and reduced price lunch (FRPL)) ee ardayda fasalka 7aad, 8aad, ama ardayda cusub ee u qalma ee fasalka 9aad.
- Aad ku jirto daryeelka ilmaha ee dawlada gobalka bixiso, ama aad tahay qof dawlada gobalka biisho dhigtana inta u dhexaysa fasalka 7aad iyo qalin jabinta dugsiga sare.

## 2022-23 celceliska dakhliga qoyska

Tirada dadka Guriga ku nool	Dakhliga Sanad kasta <sup>1</sup>	Dakhliga Billaha ah	Dakhliga Asbuucii
2	\$33,874	\$2,823	\$652
3	\$42,606	\$3,551	\$820
4	\$51,338	\$4,279	\$988
5	\$60,070	\$5,006	\$1,156
6	\$68,802	\$5,734	\$1,324
Xubno Dheeraad ah <sup>2</sup>	Kudar \$8,732	Kudar \$728	Kudar \$168

<sup>1</sup> Dakhliga guriga waa inuu ka yaraado ama u dhigmaa cadadkaan.

<sup>2</sup> Xubin kasta oo dheeraad ah oo kamid ah qoyska, kudar cadadka lacagta qofkii.



WASHINGTON STUDENT ACHIEVEMENT COUNCIL  
College Bound Scholarship

## Qaababka kale ee loogu qalmo

Ardayda qaar ayaan buuxin labada shardi midkood laakiin waxay xiisaynaayan inay codsadaan deeqda Ku biirista Kuleejka. La xariir barnaamijka si aad u codsato haddii aad:

- Dhigato dugsiga gaar loo leeyahay ama barnaamijka waxbarashada guriga ee Gobalka Washington aadna buuxiso shuruudaha dakhliga.
- Aad ku jirto nooc kale oo daryeelka dawlada ah aadana u qalmin FRPL.

Haddii aad u qalanto FRPL, iska qor dugsigaaga kadibna si otomaatig ah ayaa lagaaga qorayaa Barnaamijka Deeqda Kuleejka!

## Waa maxay balan-qaadku?

Ardayda doonaya inay Kuleej galaan ayaa balan qaadaaya:

- Inay ka qalin jebiyaan dugsiga sare ku yaala Washington ama dhigtaan waxbarashada guriga ayna keenaan buundo celceliskeedu yahay 2.0 GPA ama ka badan.
- Inay codsadaan kuleej.
- Inay soo gudbiyaan codsiga caawimaada dhaqaalaha (Codsiga Bilaashka ah ee Deeqda Federaalka siya Ardayda (Free Application for Federal Student Aid (FAFSA)) ama Codsiga Washington ee Deeqda Dhaqaalaha Gobalka Baxsho (Washington Application for State Financial Aid (WASFA)) intaad ku jirto sanadka ugu danbeeya ee dugsiga sare iyo sanad kasta oo aad kuleejka ku jirto.
- Waa inuusan gelin wax danbi ah.

Deeqda Waxbarashada College Bound waa barnaamij gobalka maalgasho ayna maamulaan Gudigga Guusha Ardayda ee Washington (Washington Student Achievement Council). Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka iyo deeqda waxbarashada, booqo [collegebound.wa.gov](http://collegebound.wa.gov), nagalaso xariir iimeelka oo ah [collegebound@wsac.wa.gov](mailto:collegebound@wsac.wa.gov), ama taleefanka oo ah 888-535-0747, riix dookha 1.

## Sidee ayaan ku ogaanayaa inaan ahay ardayda U diyaar Kuleejka?

Waxaad heli dontaa shahaadada U diyaar Garoowga Kuleejka oo laguugu soo dirayo boostada. Haddii aan doonayno xog dheeraad ah, waan kulasoo xariiri doonaa. Xaqiiji inaad uga waranto shaqaalaha barnaamijka haddii aad guurto ama aad badesho meesha lagaala soo xariiraayo.

## Maxaa xigga?

Marka aad hesho shahaadada, shaqaalaha barnaamijka ayaa sii wadi doona inay kaaga warbixiyaan xogta muhiimka ah iyo xogihii ugu danbeeyay.

## Sidee ayaan ku helayaa deeqda waxbarashada?

- Waa inay buuxshaan shuruudaha balan qaadka deeqda waxbarashada ayna buuxshaan shuruudaha daganaanshaha ee gobalka.
- Dirso codsiga deeqda dhaqaalaha intaad ku jirto sanadka ugu danbeeya ee dugsiga sare iyo sanad kasta oo aad kuleejka ku jirto. Kuleejkaaga ayaa go'aaminaaya haddii aad buuxin doonto shuruudaha dakhliga.
- Waa in lagaa aqbalaa aadna dhigtaan kuleejka—waxaa jira in ka badan 65!
- Waa inaad noqotaa arday guul ka gaara kuleejkaaga.